

DIB-U-DHISKA BUUNDADA GRAND AVE

Buundada Grand Avenue ee dul marta Midtown Greenway



Guudmarka Mashruuca

Buundada Grand Avenue waxaa la dhisay sanadkii 1914KII, iyadoo dul maraysa meesha maanta loo yaqaano Midtown Greenway. Markii hore waxaa loo dhisay si waddadu uga soocdo gaadiidka tareenada. Maanta weli waa isku-xir muhiim ah oo ka dhex jira xaafadda Whittier ee Koonfurta Minneapolis.

Sababo la xiriira da'deeda, Magaalada waxay u baahan tahay inay dib u dhiso buundada si loo sii wado isticmaalkeeda. Dib-u-dhiskani wuxuu sidoo kale oggolaan doonaa isbeddello lagu sameeyo naqshadda waddada ee dusha sare ee buundada. Isbeddellada ayaa diiradda saari doona badbaadada iyo gelitaanka dhammaan isticmaaleyaasha waddooyinka.

Yoolalka Mashruuca

- Dib u dhis buundada si loo hubiyo isticmaal ammaan ah oo wax ku ool ah
- Inay u sii adeegto isticmaalayaasha waddada korka iyo isticmaalayaasha jidka hoose
- In la hagaajiyo badbaadada iyo gellitaanka waddada ee dusha buundada
- In la yareeyo saameynta dhismaha ku yeelan karo guryaha ku dhow intii suurtagal ah
- In la ilaaliyo astaamaha taariikhiga ah ee buundada
- In la hagaajiyo muuqaalka guud ee goobta

Jadwalka Mashruuca

2023-2024	2025-2026	2026/2027	2027
Qorsheyn > Naqshadeyn > Dhisme > Dhammeystir			

Guga 2026: Qaabka waddada ee buundada ayaa la dhammeystiri doonaa waxaana ansixin doona Golaha Magaalada.

Xilliga Kullaylaha ee 2026: Jadwalka hordhaca ah ee dhismaha ayaa la go'aamin doonaa. Waxyaabaha cusub ee ku saabsan saameynta dhismaha ayaa lala wadaagi doonaa bulshada.

Xilliga Dayrta 2026 - 2027: Inta badan dhismaha wuxuu dhici doonaa 2027ka, balse waxaa suuragal ah inuu bilowdo Dayrta 2026ka. Macluumaadka la cusboonaysiiyay ayaa lala wadaagi doonaa ka hor inta uusan dhismuhu bilaaban.



Wax badan ka ogow

Booqo bogga mashruuca oo iska diiwaangeli si aad u hesho wixii soo kordha.

www.minneapolismn.gov/government/projects/grand-ave-bridge-midtown-greenway/



Qorshaha Hawlgalka Gaadiidka

Mashruucan waa mid la jaanqaadaya Qorshaha Hawlgalka Gaadiidka, Aragtida Magaalada ee wadooyin cagaaran, amaan ah, casri ah oo adeega dhamaan dadka oo dhan iyo sida ay doonayaan in ku garaan goobaha kala duwan.

Nala soo xiriir si aad

Abdullahi Abukar, Transportation Engineer - Public Works

☎ 612-673-2463 ✉ Abdullahi.Abukar@MinneapolisMN.gov

Andrew Schmitz, Transportation Planner - Public Works

☎ 612-673-2721 ✉ Andrew.Schmitz@MinneapolisMN.gov

For reasonable accommodations or alternative formats please contact:

Andrew Schmitz, Transportation Planner - Public Works

☎ 612-673-2721 ✉ Andrew.Schmitz@MinneapolisMN.gov

People who are deaf or hard of hearing can use a relay service to call 311 at 612-673-3000. Para ayuda, llame al 311. Rau kev pab, hu 311. Hadii aad caawimaad u baahantahay, wac 311.